GUNDERSEN HEALTH SYSTEM®

Siyaasadda

| | |
|---|---|
| **Mowduuca** | Siyaasadda Biilasha Qofka Iska Bixiyo iyo Aruurinta |
| **Nambarka Furaha** | RevCycl-1055 |
| **Qeybta** | Wareegga Dakhliga |
| **Qeybta Hoose** | Maamulka Wareegga Dakhliga |
| **Qeybta** Waaxda **Xariirka** | John Wolfe |
| **Laga Bilaabo Taariikhda** | 1/8/2023 |
| **Taariikhda Baddalaadda Xigta** | 1/8/2025 |

# Tixraacyada

GL – 2555 Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda
GL – 3001 EMTALA: Aruurinta Macluumaadka Maaliyadda
29 CFR §§ 1.501(r)-4, 5, iyo 6
Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka
Badbaadinta Bukaanka iyo Sharciga Daryeelka la Awoodo (ACA)
Jadwalka Dambe 1aad:

# Lagu Dabaqi Karo

Dhamaan bukaanka Siistemka Caafimaadka Gundersen Saint Elizabeth Hospital and Clinic, Inc. (halkaan kaddib, loo yaqaan "GSEHC") ee adeegyada daryeelka caafimaadka ka qaata Xarunta Daweynta Gundersen Saint Elizabeth's Hospital and Clinic Inc.

# Oraahda Ujeedada

Ujeedada Siistemka Caafimaadka Gundersen Saint Elizabeth's Hospital and Clinic, Inc. waxay tahay in aan isa soocno anaga oo adeegsana heerka sare ee loo fulliyo daryeelka bukaanka, waxbarashada, cilmi baarista iyo hagaajinta caafimaadka xagga bulashadaha aan u adeegno. Aragtideeda waxay tahay in la xoojiyo caafimaadka iyo fiyoobidda bulshadena, taasoo kobcisa naf kasta aan taabano, sida bukaanka, qoysaska, iyo shaqaalaha.

Biilasha Qofka Iska Bixiyo ee GSEHC iyo Siyaasadda Aruurinta waxay waafaqsan tahay ujeedadeeda iyo waxa ay aaminsan tahay. Waxaa loogu talogalay in lala kulmo sharuudaha dhamaan sharciyada federaalka, gobolka, iyo deegaanka, ee lagu dabaqi karo, kana mid ah iyadoo aan la xadidin, qeybta 1.501(r) ee Xeerka Adeegga Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Service Code) ee 1986, sida loo baddalay, iyo sharciyada hoos yimaada, iyo Sharciga Federaalka ee la Xariira Badbaadinta Bukaanka iyo Daryeelka la Awoodo (Federal Patient Protection and Affordable Care Act) (ACA).

Si GSEHC ay si mas'uul ah u maamusho ilaheeda maaliyadda inta ay ku hawlan tahay kaalmada ay siiso bukaanka u baahan maaliydda, bukaanka waxaa laga filaa in ay wax ku biiriyaan kharashka ku baxa daryeelkooda taasoo ku saleysan awoodda qofka u leeyahay in uu bixiyo iyo/ama sharuudaha ceymiskooda. Siyaasaddaan Biilasha Qofka Iska Bixiyo iyo Aruurinta (Self-Pay Billing and Collection Policy) iyo Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy) waxay aasaas u noqon doonaan dhaqanka aruurinta GSEHC ee la xariira xisaabaadka bukaanka. Siyaasaddaan waxay sharaxdaa habka GSEHC u xalliso waajibaadka bukaanka ka saaran lacag bixinta iyo waxay bukaanka ogeysiisaa siyaasadda kaalmada maaliyadda GSEHC (Financial Asiistance Policy).

Sida waafaqsan siyaasaddaan, lama dabageli doono talaabadaha aruurinta aan caadiga ahayn ee ka soo horjeeda bukaanka, ama mas'uulka bukaanka, ka hor inta aan si macquul ah loo ogaanin haddii bukaanka ama mas'uulka xaq u leeyahay kaalmada sida hoos timaada Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GSEHC (Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda).

Bukaanka la siiyay daryeel degdeg ah ama daryeel caafimaad ahaan lagama maarmaan ah, waxaa la siin doonaa fursad ay ku soo dalbadaan kaalmada maaliyadda sida waafaqsan ACA iyo sharciyadeeda fullinta. GSEHC ma samayn doonto takoor ku saleysan da'da, jinsiga, isirka, caqiiqdada, midabka, diinta, itaal darrida, diinta, jihada jinsiga, asal qaran, ama xaaladda socdaalka marka ay go'aan ka gaareyso kaalmada maaliyadda.

Siyaasaddaan waxay la xariirtaa dallacaadda la xariirto adeegyada daryeelka caafimaadka la siiyay Xarunta Daweynta Gundersen Lutheran (Gundersen Lutheran Medical Center, Inc.) iyo/ama Gundersen Clinic, Ltd.

## Sifeynta

**Muddada Arjiga:** Muddo 120 maalin gudahooda laga bilaabo bayaanka-ruqsadda kaddib.

**Deynta aan la bixininuna:** Waajibka saaran bukaanka in uu iska bixiyo deynta balse uusan bixinin muddo 120 maalin kaddib marka GSEHC go'aansato mas'uuliyadda maaliyadda una dirtay bukaanka, ama mas'uulka bukaanka, bayaanka biilka kowaad, saaridda kaddib, ama uusan waafaqsaneen qorshaha lacag bixinta lagu heshiiyay.

**Kaalmada Daryeelka Musiibada:** Kaalmada maaliyadda la siiyo bukaanka xaqa u yeesha lana socoto dakhliga soo gala qoyska sannadkii oo ka badan 400% Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level); iyo hanti ka yar 600% Heerka Saboolnimada Federaalka; iyo waajibka maaliyadda ee ka dhasha adeegyada daweynta ay GSEHC bixiso kana badan 25% dakhliga guud ee sannadkii soo gala qoyska.

**Kaalmada Daryeelka la Dhimay:** Kaalmada Maaliyadda laga helo dhimista - kuna saleysan dakhliga soo gala bukaanka xaqa u yeesha, ama mas'uulka, dakhliga qoyska sannadkii u dhexeeyo 200-400% Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level) lagu dabaqi karo.

**Falka Aruurinta Aan Caadiga Ahayn (ECA):** Talaabo kasta oo ka soo horjeedo qofka mas'uulka ka ah biilka aan la bixinin oo la xariira adeega ay bixisay GSEHC una baahan habka sharciga ama maxkamadda ama soo sheegidda macluumaad qalifsan oo ku saabsan mas'uulka (mas'uuliinta) wakaaladaha wargelinta deynta

macaamilka ama xafiisyada deynta. Kama mid aha ECAyada in biilka loo diro bukaanka ama mas'uulka, telefoonka laga waco bukaanka lana weydiiyo su'aalo macquul ah, ama xisaabta oo lagu wareejiyo dhinac saddaxaad, ujeedadana tahay aruurinta sida waafaqsan sharuudaha 29 CFR 1.501(r)-6(b)(2) iyo iyadoo aan la adeegsanin habka sharciga ama maxkamadda.

**Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka:** Sannad kasta lagu soo saaro Diiwaanka Federaalka (Federal Register) ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (Department of Health and Human Services) (HHS).

**Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL)** Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level) (FPL) waxay adeegsataa heerarka dakhliga ee ku kala duwan tirada qoyska iyo xubnaha ka tirsan si loo ogaado saboolka Mareykanka. Waxaa la casriyeyaa muddo ka muddo gudaha Diiwaanka Federaalka, waxaana sidaas sameyaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (Department of Health and Human Services) sida hoos timaada awoodda qeybta hoose (2) ee Qeybta 9902, Cutubka 42, Xeerka Mareykanka. Tilmaamaha FPL ee iminka jira waxaa laga tixraaci karaa http://aspe.hhs.gov/POVERTY/.

**Kaalmada Maaliyadda** Kaalmada la siiyo bukaanka xaqa u yeesho ama qofka (dadka) mas'uulka ka ah ee laga yaabo in ay la kulmaan dhibaato xagga maaliyadda, in laga dhaafo dhamaan ama qeyb ka mid ah waajibka maaliyadda xagga degdegga ama daweynta daryeelka loo baahan yahay eewax laga qaatay GSEHC.

**Daryeelka Lacag La'aan ah:** 100% ka dhaafid loo sameeyo waajibka maaliyadda bukaanka ka saaran adeegyada daweynta la ogol yahay ay GSEHC bixiso lana siiyo bukaanka xaq u yeesha, ama ballan qaadeyaashooda, dakhliga sannadkii soo gala qoyska oo ah ama ka hooseeyo 200% Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level).

**Ballan Qaadaha:** Qofka, aan ahayn bukaanka, ee mas'uul ka ah bixinta biilka bukaanka.

**Dallacaadda Guud:** Iskudarka kharashka la soo dallaco ee ku saleysan sicirka loo dajiyay bixinta adeegyada daryeelka bukaanka ka hor inta aan laga goynin dakhliga.

**Soo Koobidda Warar Fasiix ah:** Bayaan qoran oo soo kooba Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy), oo ku qoran qodobo fasiix ah, kooban, oo loogu talogalay in akhristaha fahmo sida ugu dhakhsiyaha badan iyo sida ugu dhamaystiran ee suurtogalka ah.

**Qorshaha Lacag Bixinta:** Qorshaha lacag bixinta ay ku heshiyeen GSEHC iyo bukaanka, ama mas'uulka, xagga khidmadaha uu qofka jeebkiisa ka bixiyo. Qorshaha lacag bixinta wuxuu tixgelin doonaa daruufaha maaliyadda bukaanka, xisaabta uu qabo, iyo haddii ay jiraan lacag bixin hore.

**Xisaabaadka Qofka Iska Bixiyo ama Mas'uuliyadda Maaliyadda Qofka Iska Bixiyo:** Xisaabaadka waajibka ku ah bukaanka, ama mas'uuliinta bukaanka in ay toos u siiyaan GSEHC. Kuwaan waxaa ka mid ah baaqiga la rabo kaddib marka la bixiyo sheegashada ceymiska, xisaabaadka laga rabo bukaanka aan ceymis haysanin, ama baaqiga kaddib marka la toosiyo sida waafaqsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GSEHC (GSEHC Financial Assistance Policy).

**Dhimista la Siiyo Qofka aan Haysanin Ceymis;** Dhimista waxaa heli kara bukaanka ama mas'uuliinta aan haysanin ceymiska dhinac saddaxaad. Dhimista qofka aan haysanin ceymis waxay la'eg tahay xisaabta guud ahaan la soo dallaco (AGB).

# Fullinta

**XAL KA GAARISTA XISAABTA**

GSEHC waxay xil iska saartay in ay kaalmada maaliydda siiso bukaanka xaqa u yeesho, ama mas'uuliinta bukaanka, kuwa aan haysanin ceymis ama kuwa haysta ceymis liito, ay ku adkaan doonto in ay bixiyaan kharashka daryeelka ay GSEHC ka bixiso adeegyada la ogol yahay. Waa la dabageli doonaa bukaanka lagu tilmaamo in uu awood u leeyahay bixinta kharashka ku baxay adeegga. Hababka aruurinta ku qoran siyaasaddaan waxaa si joogto ah loogu dabaqi doonaan dhamaan bukaanka iyadoo aan la fiirinin xaaladda ceymiska, waxaa loo hoggaansami doonaa sharciyada lagu dabaqi karo iyo ujeedada GSEHC waxay si fasiix ah u gaarsiin doontaa bukaanka, ama mas'uuliinta bukaanka, sida loo helo brograamyada kaalmada maaliyadda, iyo sidoo kale waxyaabaha laga filaayo lacag bixinta. Tan waxaa la samayn doonaa inta ay socoto wareegga dakhliga.

Waa siyaasadda GSEHC in ay mamnuucdo in ay xaaladaha daweynta degdegga ku xerto bixinta kharashka ka hor inta bukaanka aan la siinin adeegyada ama lagu bilaabo hawlaha soo aruurinta kharashka ee soo faragelin kara bixinta daryeelka daweynta degdegga (fiiri siyaasadda GL-3001)

Dhamaan macluumaadka maaliyadda laga helo bukaanka, ama ballan qaadeyaashooda, waxay ahaan doonaan qarsoodi.

**Hubinta Mas'uuliyadda Maaliyadda Bukaanka:** GSEHC waxay qaadi doontaa tallaabooyin macquul ah si ay u hubiso waajibka ka saaran lacag bixinta bukaanka. Waxaa lagu dhaqaaqi doonaa falal si loo aqoonsado bixiyeyaasha saddaxaad looguna kaalmeeyo bukaanka si ay u xalliyaan biilashooda kaddibna GSEHC waxay lacag bixinta ka raadsan doontaa dhamaan bixiyaasha dhinaca saddaxaad ee la ogsoon yahay si bukaanka loogu kaalmeeyo in ay xalliyaan biilashooda. Waa la dabageli doonaa waqtiga iyo sida habboon ee loo gudbiyo hababka sheegashada bixiyaha saddaxaad si loo hubsado sida habboon ee loo fulliyo sheegashada. Haddii loo baahdo iyo suurtogal noqoto, GSEHC waxay la shaqeyn doontaa bukaanka in uu ka kaalmeeyo xallinta arrimaha sheegashada lacag bixinta ceymiska.

**Xallinta Baaqiga Bukaanka:** Kaddib marka go'aan laga gaaro mas'uuliyadda maaliyadda ee saaran bixinta maaliyadda ee saaran bukaanka ama mas'uulka bukaanka, GSEHC waxay (i) ogeysiin doontaa bukaanka, ama mas'uulka bukaanka siyaabaha kala duwan ee oo xalliyo baaqiga, iyo (ii) waxay siisaa siyaasadda Kaalmada Maaliyadda, Arjiga Kaalmada Maaliyadda, Soo Koobid ku Qoran Luqad Fasiix ah, iyo Siyaasadda Iska Bixinta Biilasha iyo Aruurinta. Haddii bukaanka ama mas'uulka uusan awoodin in uu bixiyo baaqiga laga rabo muddo labaatan iyo kow (21) maalin gudahooda, waxaa la ogoysiin doonaa fursadaha kale ee la heli karo si loo xalliyo baaqiga qofka ku harray, kana mid ah qorshooyinka lacag bixinta, iyo/ama kaalmada maaliyadda. Waxaa lagu dhaqaaqi doonaa dadaal macquul ah oo lagu ogeysiin doono bukaanka, ama mas'uuliinta bukaanka, ee siyaasadda kaalmada maaliyadda GSEHC, waxaana la siin doonaa macluumaad ku saabsan sida loo soo gudbiyo arjiga kaalmada maaliyadda.

**Bayaanada:** GSEHC waxay ugu yaraan saddax (3) bayaan gaar ah u diri doontaa aruurinta xisaabaadka qofka iska bixiyo, looguna dirro boostada ama email, cinwaankii ugu dambeyay ee la ogsoon yahay ee bukaan kasta ama ballan qaade kasta. Hase ahatee, looma baahna bayaano dheeraad ah kaddib marka mas'uulka soo gudbiyo arji dhamaystiran uu ku helo kaalmo maaliyad sida hoos timaado siyaasadda kaalmada maaliyadda ama uu si buuxdo u bixiyo Waa waajibka saaran mas'uulka in uu bixiyo cinwaan sax ah oo lagu soo gaarsiiyo warqadaha ama haddii uu guuro. Haddii xisaabta aysan lahayn cinwaan sax ah, waa in la gaaro go'aanka in la geystay dadaal macquul ah. Dhamaan bayaanada qofka iska bixiyo waxaa ka mid ah, balse kuma eka:

1. Dallacaadda adeegyada noocaas;
2. Xisaabta loo baahan yahay in uu bixiyo bukaanka ama mas'uulka;
3. Ogeysiis qoran oo la arki karo oo la socodsiisa iyo ogeysiisa bukaanka ama mas'uulka helitaanka kaalmada maaliyadda ee hoos timaada siyaasadda kaalmada maaliyadda kana mid ah nambarka telefoonka waaxda iyo tooska bogga internetka, halkaas oo laga yaabo in laga helo koobiyada warqadaha, sida Arjiga Kaalmada Maaliyadda;
4. Ugu yaraan mid ka mid ah bayaanada boostada ama email loogu diray waxaa ka mid ah ogeysiis qoran oo bukaanka ama mas'uulka bukaanka ogeysiisa ECAyada laga yaabo in lagu dhaqaaqo haddii bukaanka ama mas'uulka aysan dalbanin kaalmada maaliyadda sida hoos timaado siyaasadda kaalmada maaliyadda ama aysan bixinin xisaabta laga raabo taariikhda ugu dambayso ee ku qoran biilka. Bayaankaan waxaa la socda soo koobidda luqad fasiix ah oo ku saabsan siyaasadda kaalmada maaliyadda.

**Kaalmada Maaliyadda** Macluumaadka kaalmada maaliyadda waxaa si balaaran loo siin doonaa bukaanka iyo xubnaha bulshada ay GSEHC u shaqeyso. Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GSEHC, Arjiga Kaalmada Maaliyadda, iyo Soo Koobidda Luqad Fasiix ah oo ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda waxaa laga heli karaa bogga siistemka GSEHC. Koobiyada warqadda ee macluumaadkaan waxaa la heli doonaa kaddib marka la codsado, lacag la'aan.

Macluumaadka ku saabsan kaalmada maaliyadda, kana mid ah Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GSEHC iyo tilmaamaha ku saabsan sida loola xariiro GSEHC si loo helo kaalmo, waxaa la siin doonaa bukaanka marka la seexiyo ama la fasaxo. Waxaa kaloo la heli karaa macluumaadka kaalmada maaliyadda, oo lacag la'aan ah, kaddib marka codsiga bukaanka si la arki karo loo soo geliyo diiwaangelinta iyo goobaha laga soo galo, waaxda degdegga isbitaalka, iyo waxaa sidoo kale la soo raacin doonaa bayaanada bil kasta loo gudbiyo bukaanka.

**Qorshaha Lacag Bixinta:** Bukaanka, ama ballan qaadeyaashooda, waxaa kaloo macluumaad laga siin doonaa qorshooyinka lacag bixinta. Bukaanka aan awoodin in ay bixiyaan baaqiga muddo labaatan iyo kow maalin (21) gudahooda, waxaa dhici karto in la siiyo qorsho lacag bixin, ka madax banaan korsaar, loona dheereeyo muddada ilaa 36 bil ama saddax (3) sanno. Diyaarinta qorshooyinka lacag bixinta noocaas waa in lala sameeyo Adeegga Maaliyadda Macaamilka GSEHC (GSEHC Customer Financial Service) Haddii bukaanka, ama mas'uulka bukaanka, uusan heshiis kala gaarin lacag bixinta ama haddii bukaanka, ama mas'uulka bukaanka, ku guul dareysto in uu u hoggaansamo qorsaha lacag bixinta, waxaa dhici karto in xisaabta lagu wareejiyo wakaalad dibadda ka ah wakaaladda aruurinta.

Haddii bukaanka GSEHC ama mas'uulka bukaanka loo sameyay qorshaha lacag bixinta kaddibna la siiyo adeegyada GSEHC soona baxaan baaqi dheeraad ah oo laga rabo in qofka uu iska bixiyo, waxaa dhiici karto

in wax laga baddalo lacag bixinta iminka jirta ee bukaanka ama mas'uulka bukaanka si loo tixgeliyo dallacaadda dheeraadka.

Qorshooyinka lacag bixinta waxaa heli kara bukaanka, ama ballan qaadeyaashooda, ee u qalma in ka yar 100% kaalmada maaliyadda, balse aan awoodin in ay bixiyaan baaqiga lagu leeyahay oo idil. Qorshooyinkaan lacag bixinta waxay hoos imaan doonaan isla sharciyada lagu dabaqi karo bukaanka ama mas'uuliinta aan xaqa u yeelanin kaalmada maaliyadda.

**Qilaafka Biilasha:** GSEHC waxay ogeysiin doontaa bukaanka sida ay u soo jeedin karaan su'aasha ama qilaafka ay ka qabaan biilasha. Qilaafaadka waxaa loo jeedin doonaa waaxda Adeegyada Maaliyadda Macaamilka GSEHC. Magaca waaxda, Adeegyada Maaliyadda Macaamilka (Customer Financial Services) iyo nambarka telefoonka lacag la'aanta oo loo baahan yahay in loo diro murranka waxaa lagu qori doonaa dhamaan bayaanada bukaanka ee soo baxa bil kasta iyo ogeysiisyada aruurinta ay dirto GSEHC. Waaxda Adeegyada Maaliyadda Macaamilka (Customer Financial Services) waxay ka jawaabi doontaa su'aalaha ay soo jeediyaan bukaanka muddo 30 maalin la shaqeeyo gudahooda kaddib marka la soo gaarsiiyo murranka. Tan ku saabsan murranka u baahan baaritaan dheeraad ah, dhamaan falalka aruurinta waa istaagi doonaan ilaa go'aan kama damabays ah laga gaaro xisaabta laga murransan yahay.

## FALALKA ARUURINTA AAN CAADIGA AHAYN LANA QAADO HADDII LA BIXIN WAAYO KHARASHKA

**Falalka Aruurinta Deynta aan la Bixinin** Ma jirto xisaab laga qaadi doono talaabo xagga soo aruurinta deynta aan la bixinin, ama ECA, muddo 120 maalin laga bilaabo bayaanka kowaad ee ka dambeeyo saaridda ka hor inta GSEHC aysan ku dhaqaaqin dadaal macquul ah ay ku ogaato haddii bukaankaas uu xaq

u leeyahay kaalmada maaliyadda. Waa la soo gaabin karaa muddadaan 120ka maalin haddii go'aan laga gaaro kaalmada maaliyadda, la sameeyo qorshaha lacag bixinta kuna heshiyaan bukaanka ama mas'uulka, iyo bukaanka ama mas'uulka aysan u hoggaaansamin qorshaha lacag bixinta. Talaabo lagama qaadi doono bukaanka haddii bukaanka, ama mas'uulka, keenaan warqado muujiya in isaga ama iyada soo dalbatay ceymis hoos yimaada Medicaid, ama brograamyo kale oo la xariira caafimaadka ay dadweynaha mas'uul ka yahiin, ee laga yaabo in ay bixiyaan sheegashada soo hartay, welina go'aan laga gaarin xaq u yeelashada.

Ka hor inta aan xisaabta bukaanka loo dirin wakaaladda aruurinta, GSEHC waxay si macquul ah ugu dadaali doontaa in ay macluumaad ka bixiso kaalmada maaliyadda kaddibna waxay ugu yaraan saddax (3) bayaan qoran u diri doontaa bukaanka ama mas'uulka. Bayaanka kasta waxaa ku jira ogeysiis la arki karo oo ku saabsan siyaasadda kaalmada maaliyadda GSEHC, nambarka telefoonka loo baahan yahay in la waco si loo weydiisto kaalmo, iyo cinwaanka bogga internetka tooska. Haddii aan lagu guuleysan dhamaan dadaalka lagula xariiro bukaanka, ama mas'uulka bukaanka, lana helin cinwaan sax ah oo loo diro warqaadaha aan la gaarsiinin, xisaabaadka waxaa loo diri doonaa wakaaladda aruurinta.

Muddo 240 maalin gudahooda laga bilaabo bayaanka kowaad ee ka dambeeyo saaridda, haddii bukaanka, ama mas'uulka, dalbado kaalmada maaliyadda, waa la qaban doonaa arjiga kaddibna waxaa istaagi doono falalka aruurinta inta laga gaaraayo go'aanka xaq u yeelashada. Haddii arjiilaha loo ogolaado daryeel Lacag La'aan ah (Free Care), lama qaadi doono talaabo kale oo dheeraad ah oo looga soo qaado lacagta. Haddii arjiilaha loo diido kaalmada maaliyadda ama loo ogolaado daryeelka la dhimay, waxaa la qaadi doonaa talaabado si loo xlliyo waajibka lagu leeyahay. Haddii xisaabta aan la xallinin ama la diyaarinin in xal laga gaaro xisaabta, waxaa la qaadi doonaa talaabado dheeraad ah oo lagu soo aruuriyo.

Haddii qofka soo gudbiyo arji qabyo ah waqtiga arjiga, GSEHC waa in ay (i) joojiso dhamaan talaabadaha aruurinta, (ii) waa in ay qofka siiso ogeysiis qoran oo sharaxa macluumaadka dheeraadka iyo/ama warqadaha loo baahan yahay sida hoos timaado Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda ama foomka arjiga loo baahan yahay in la soo gudbiyo si loo dhamaystiro arjiga Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda iyo (iii) in ay siiso macluumaadka lagala xariiro GSEHC. Arjiga wuxuu shaqeyn doonaa muddo soddon (30) maalin laga bilaabo taariikhda warqadda loo dirray arjiilaha soo codsaday macluumaadkaan. Haddii arjiilaha uusan ka soo jawaabin muddo 30 maalin, waa la soo diidi doonaa arjiga.

Arjiilaha loo ogolaado kaalmada maaliyadda waxaa loo celin doonaa lacag bixinta ka badan xisaabta uu qabo bukaanka ama mas'uulka bukaanka xagga xisaabaadka iyaga laga siiyay kaalmo sida hoos timaado Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GSEHC. Lacag celinta waxaa lagu dabaqa lacag bixintii dheeraadka $5.00 ama ka badan. Sida waafaqsan siyaasaddaan, guud ahaan, kaalmada maaliyadda ma gaarsiisna lacagaha qofka ku darro ama baaqiga harray kaddib marka shirkadda ceymiska bixiso haddii bukaanka ku guul dareysto in uu helo tixraacin ku habboon ama ogolaasho, ama haddii kaalmada noocaas aysan waafaqsaneyn heshiiska kuntruraadka ceymiyaha, sidaas darteed lama soo celin doono lacag bixintaas.

Waxaa dhici karto in GSEHC isticmaasho falalka noocaas marka ay ku hawlan tahay in ay lacag bixinta ka soo xaasiliso bukaanka ama mas'uuliinta (i) lagu leeyahay baaqi aan la bixinin in ka badan 120 maalin, kuwa aan dalbanin kaalmada maaliyadda, (ii) bukaanka ama mas'uuliinta aan waafaqsaneen qorshaha lacag bixinta lagu heshiyay, ama (iii) bukaanka ama mas'uuliinta aan daacad ka ahayn in ay bixiyaan baaqiga harray.

Ugu yaraan 30 maalin ka hor inta aan la bilaabin hal ECA ama ka badan si ay u hesho kharashka ku baxay daryeelka la bixiyay, GSEHC waxay bukaanka ama mas'uulka siin doontaa ogeysiis qoran oo muujiya in dadka xaqa u yeesha ay heli karaan kaalmada maaliyadda, sida qofka u dalban karo kaalmada maaliyadda, iyo meesha laga heli karo Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda. Ogeysiiska qoran ee noocaas ah waxay tilmaami doonaan ECAyada in GSEHC ama dhinac kale oo loo fasaxay rabto in ay bilowdo si ay u hesho lacag bixinta la xariirta daryeelka, iyo muujisa waqtiga ugu dambeeyo kaddib marka ECAyada noocaas la bilaabi karo. Taariikhda ugu dambeyso kama soo hormari doonto muddada 30ka maalin ee ka dambayso taariikhda ogeysiiska qoran la siiyay bukaanka ama mas'uulka bukaanka. Ogeysiiska waxaa la soo raacin doonaa Soo Koobidda Luqad Fasiix ah oo ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda. GSEHC waxay si macquul ah ugu dadaali doontaa in ay qofka afka ka ogeysiiso Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GSEHC iyo sida bukaanka uu kaalmo uga heli karo hawsha Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda.

Waxaa soo socdo liiska ECAyada ay laga yaabo in GSEHC ku dhaqaaqdo si ay u hesho lacag bixinta daryeelka: (i) ogeysiinta wakaaladaha warsiinta deynta macaamilka, (ii) dabagalka go'aanada sharciga, (iii) gudbinta qaanta, ama (iv) la wareegidda mushaarka si loo soo aruuriyo baaqiga haray.

**Wakaaladaha Aruurinta:** Wakaaladaha aruurinta waxaa loo isticmaali karaa in lagu kaalmeeyo dabagalka bukaanka lagu leeyahay baaqiga qofka iska bixiyo. Xisaabaadka ma loo gudbin doonaa wakaaladda aruurinta mudda 120ka maalin gudahooda kaddib marka la soo saaro bayaanka koowaad, saaridda kaddib, haddii uusan bukaanka ama mas'uulka u hoggaansamin qorshaha lacag bixinta heshiiska.

Ka hor inta aan aruurinta lagu wareejinin wakaalad dibadda ka shaqeyso, waa la fiirin doonaa xisaab kasta si loo hubiyo in GSEHC si macquul ah ugu dadaashay in ay ogaato in bukaanka ama mas'uulka bukaanka uu xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda. Fiirintaan kaddib, xisaabta waxaa loo gudbin karaa wakaaladda

aruurinta dibadda.  Xisaab kasta iyo dhamaan xisaabaadka loo gudbiyo wakaaladda aruurinta waa ina y u hoggaansano sharuudaha kaalmada maaliyadda.

GSEHC ma ogola kadeed, xumaan, cadaadin, been abuur, khayaano ama luqad qofka marrin habaabisa ama dhaqanka aruurinta ay geystaan qareenada, wakaaladaha, ama wakiiladooda iyo shaqaalaha. GSEHC ma ogola kadeed, xumaan, cadaadin, been abuur, khayaano ama luqad qofka marrin habaabisa ama dhaqanka aruurinta ay geystaan shaqaalaha mas'uulka ka ah aruurinta deynta daweynta lagu leeyahay bukaanka.

Dhamaan wakaaladaha aruurinta ee u shaqeeyo GSEHC waxay haysan doonaan heshiis qoran oo caddeyn doono in loo baahan yahay in hawlaha aruurinta waafaqsan yahiin siyaasadaha GSEHC iyo in ay u hoggaansan yahiin xaaladda lagu dabaqi karo iyo sharciyada federaalka.  Ugu yaraan, heshiiska noocaas waa in uu dhalliyo waxa soo socdo:

1. Haddii qofka soo gudbiyo arjiga Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda kaddib marka cid kale loo diro ama la iibiyo deynta balse aan la gaarin dhamaadka muddada arjiga, dhinaca waxay joojin doontaa ECAyada si uu u helo lacag bixinta daryeelka.
2. Haddii qofka soo gudbiyo arjiga Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda kaddib marka la fulliyo ama la iibiyo deynta balse ka hor inta aan la gaarin muddada arjiga kaddibna la ogaado in uu xaq u leeyahay daryeelka sida waafaqsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda, dhinaca waxay waxa soo socda u samayn doontaa waqti ku habboon.
3. Ku adkeeyso hababka ku qoran heshiiska hubiya in qofka uusan bixinin, iyo in aysan waajib ku ahayn in uu bixiyo, wadajirka dhinaca iyo hay'adda isbitaalka, in ka badan isaga ama iyada, ayaa looga baahan yahay in ay bixiyaan daryeelka sida waafaqsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda-qofka xaqa u yeesha.
4. Haddii lagu dabaqi karo iyo haddii dhinaca (baddalkii hay'adda isbitaalka), ay awood u leedahay in ay sidaas samayso, qaado dhamaan talaabadaha macquulka ah ee la heli karo si looga noqdo ECA kasta (marka laga reebo iibinta deynta ama ECA kale) oo laga qaado qofka.
5. Haddii dhinac uu deynta ku wareejiyo ama ka iibiyo dhinac kale inta lagu dhex jiro muddada arjiga, dhinaca waxay heshiis qoran ka heli doontaa dhinac kale kana mid ah dhamaan qeybaha lagu sharaxay baragraafkaan (c) (10).

Koobiga Biilka Qofka Iska Bixiyo ee GSEHC iyo Siyaadaha Kaalmada Maaliyadda iyo Aruurinta waxaa la siin doonaa wakaalad kasta oo ka shaqeysa aruurinta xisaabaadka qofka iska bixiyo ee GSEHC si loo hubiyo u hoggaansamida siyaasadaha.  GSEHC waxay faylka ku hayn doontaa aqoonsi saxiixan oo ku saabsan in la helay siyaasadahaan iyo heshiiska in si daacad ah loogu dadaalo loona hoggaansamo siyaasadaha.

Haddii bukaanka, ama mas'uulka bukaanka, dalbado kaalmada maaliyadda muddo 240 maalin gudahooda laga bilaabo bayaanka kowaad ee ka dambeeyo saaridda kaddib ama 30 maalin kaddib marka loo diro ogeysiiska talaabada aruurinta loo baahan yahay in la bilaabo, waa la ogolaan doonaa arjiga kaddibna waxaa la joojin doonaa talaabadaha aruurinta inta laga ogaan doono go'aanka xaq u yeelashada.    Haddii arjiilaha loo ogolaado daryeel Lacag La'aan ah (Free Care), lama qaadi doono talaabo kale oo dheeraad ah oo looga soo qaado xisaabta.  Haddii arjiilaha la soo ogolaado in la siiyo daryeel la dhimay, ama loo diido kaalmada maaliyadda, waa in bukaanka ama mas'uulka uu qaado talaabo ku habboon, si uu u xalliyo baaqiga qofka iska bixiyo ee harsan, haddii kale, waxaa lagu dhaqaaqi doonaa talaabo kale oo lagu soo aruuriyo baaqiga.

**Soo Sheegidda Deynta:** GSEHC waxay u fasaxday wakaaladaheeda aruurinta in ay macluumaadka ku saabsan xisaabaadka bukaanka u gudbiyaan wakaaladaha soo sheega deynta uu qabo macaamilka. Kiisaska qaar, waxaa dhici karto in GSEHC ama wakaaladaheeda aruurinta qaadaan talaabo sharci si ay u soo aruuriyaan baaqiga bukaanka laga rabo in uu iska bixiyo. Waxaa dhici karto in wakaaladda aruurinta aysan bilaabin in ay talaabo sharci ka qaado bixin la'aanta biilka GSEHC ee laga rabo bukaanka, ama mas'uulka bukaanka, ama raadsato xukun ilaa laga gudbo muddada arjiga ee 120ka maalin ka dhamaato kaddibna GSEHC ku dhaqaaqdo dadaal macquul ah ay ku ogaato haddii bukaanka uu xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda. Haddii la gaaro go'aanka maxkamadda, waxaa la adeegsan karaa falalka soo socdo: mushaarka oo lala wareego, hantida oo la saaro qaan, iyo qaanta la sooro heshiisyada ceymiska la xariira kharashka ku baxay adeegyada ay GSEHC, baaqina ka jiro.

Waa lala tashan doonaa GSEHC ka hor inta aan laga qaadin talaabo sharci. Waa la fiirin doonaa xisaabaadka hadba sida kiiska yahay iyo waxaa la tixgelin doonaa xaaladda uu ku sugan yahay bukaanka ama mas'uulka bukaanka. Maamulka GSEHC wuxuu fiirin doonaa dhamaan hawsha aruurinta ee munaasabka ah si loo hubiyo in dhamaan iskudayidda aruurinta qofka iskiisa u sameeyo lala kulmay, iyo in xisaabta la kullanto doodaha maxkamadda.

**Deynta Lagu Leeyahay Hantida Bukaanka Dhintay Kana Dambeynin Xaas:** Waxaa dhici karto in GSEHC qaan ku sheegato hantida qofka dhintay, haddii bukaankaas uusan qabin xaas ka dambeeyo.

Xaaska uu bukaanka dhintay uga tagay biilasha GSEHC waxaa loo haystaa in ay mas'uul ka tahay bixinta waajibaadkaas, haddii GSEHC aysan bukaanka ka heli Heshiiska Hantida Guurka (Maritial Property Agreement), taasoo u suurtogelisa in uu ka baxay hantida guurka ka hor inta aan la siinin daryeelka.

# Mas'uuliyadda

## TABABARKA SHAQAALAHA

Tababarka shaqaalaha waxaa la siin doonaa shaqaalaha ku lugta leh aruurinta. Shaqaalaha mas'uulka ka ah aruurinta xisaabaadka qofka iska bixiyo waxaa la siin doonaa tababar ku saabsan adeegga macaamilka, wada xaajoodka/xallinta iyo xirfadaha aruurinta. Tababarka wuxuu xoogga saari doonaa siyaasadaha Kaalmada Maaliyadda GSEHC iyo Siyaasadaha Biilasha/Aruurinta (GSEHC Financial Assistance and Billing/Collection) iyo xilka ay iska saartay in ay dhamaan bukaanka u daweyso si naxariis ah iyo si sharaf leh. Tababarka wuxuu fiirin doonaa qoraalada aruurinta iyo macluumaadka kale ee loo baahan yahay in si dhab ah bukaanka la ogeysiiyo siyaasadaha GSEHC.

## KORMEERKA ARUURINTA WAKAALADAHA

Wakaaladaha aruurinta dhinaca saddaxaad ee u shaqeeya GSEHC waxaa loola socon doonaa si joogto ah si loo hubiyo in ay u hoggaansan yahiin siyaasaddaan.

**HELITAANKA SIYAASADDA DADWEYNAHA**

Macluumaadka ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GSEHC, iyo Siyaasadda Biilasha Qofka Iska Bixiyo ee GSEHC iyo Siyaasadda Aruurinta waxaa la siin doonaa bukaanka iyo bulshada ay u adeegto GSEHC una adeegsato ilo kala duwan. Fadlan fiiri Jadwalka Dambe 1 (Appendix 1).

**HIRGELINTA**

Luqad kasta ay xumaan, kadeed, marrin habaabin la socoto ama dabeecadda aruurinta ay geystaan shaqalaaha GSEHC, shaqaaalaha wakaaladda aruurinta deynta ama qareenada waxaa laga qaadi doonaa talaabo lagu toosiyo.

**QARSOODIGA**

GSEHC waxay badbaadin doontaa qarsoonaanta bukaan kasta, tan ku saabsan macluumaadka maaliyadda iyo wax ka qabashada macluumaadka caafimaadka qofka.

**OGOLAASHADA SIYAASADDA**

Guddiga Maaliyadda Maamulka GSEHC (GSEHC Governanace Finance Committee) waxay soo saartay iyo waxay ogolaatay siyaasadda kaalmada maaliyadda. marka ay ahayd Febraayo 2023. Waa la fiirin doonaa siyaasaddaan waqti ka waqti. Isbaddal kasta oo macno leh oo lagu sameeyo siyaasadda waa in uu soo ogolaado Guddiga Maamulka GSEHC.

**Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda**
**(Financial Assistance Policy- GMV-2555)**
**Lifaaqa Dambe 5**
**Helitaanka Siyaasadda ee Dadweynaha**

Macluumaadka ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GSEH (GHS Financial Assistance Policy), iyo siyaasadda GSEH Self-pay Billing and Collection Policy (Siyaasadda Bixinta Dallacaadda iyo Aruurinta) waxaa diyaar looga dhigi doonaa bukaanka iyo bulshada ay GHS u shaqeyso taasoo lagu gaaro ilo kala duwan.

1. Bukaanka iyo ballan qaadeyaasha waxay codsan karaan koobiyada Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda), Self-Pay Billinga ana Collection Policy, iyo/ama Plain Language Summary (Soo Koobidda Luqadda), waxaana loogu soo diri doonaa boostada:

   Gundersen St. Elizabeth's Hospital and Clinics
   Customer Financial Service
   1200 Grant Blvd W
   Wabasha, MN 55981

2. Bukaanka iyo ballan qaadeyaasha waxay koobiyada Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda), Self-Pay Billing and Collection Policy (Siyaasadda Bixinta Dallacaadda iyo Aruurinta), Financial Assistance Application (Arjiga Kaalamada Maaliyadda), iyo/ama Plain Language Summary (Soo Koobidda Luqadda) ku codsan karaan telefoonka (608) 775-8660 ama (800) 362-9567, khadka. 58660.

3. Bukaanka iyo ballan qaadeyaasha waxay koobiyada Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaamada Maaliyadda), Self-Pay Billing and Collection Policy (Siyaasadda Bixinta Dallacaadda iyo Aruurinta), Financial Assistance Application (Arjiga Kaalamda Maaliyadda), iyo/ama Plain Language Summary (Soo Koobidda Luqadda Cad) ka soo dagsan karaan www.gundersenhealth.org/faa.

4. Bukaanka iyo ballan qaadeyaasha waxay koobiyada Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaamada Maaliyadda), Self-Pay Billing and Collection Policy (Siyaasadda Bixinta Dallacaadda iyo Aruurinta), Financial Assistance Application (Arjiga Kaalamda Maaliyadda), iyo/ama Plain Language Summary (Soo Koobidda Luqadda Cad), qof ahaan ka qaadan karaan goobaha soo socda:

   a. Gundersen St. Elizabeth's Alma Clinics
      204 South Main St
      Alma, WI 54610
      (651) 565-5599

   b. Gundersen St. Elizabeth's Hospital and Clinics
      Emergency Care
      1200 Grant Blvd W
      Wabasha, MN 55981
      (651) 565-4531